# Manhajka waxbarashada luqada iswiidhishka ee loogu talagalay ajaanibka

## Ujeedada waxbarashada

Waxbarasho degmeedka ku aaddan barashada luqada iswiidhishka ee loogu tala galay ajnabiga waa waxbarasho luqadeed sare oo ujeedadeeda tahay in dadka anjnabiga qaangaarka ah la siiyo aqoon aasaasi ah oo luqada iswidhishka ah. Marka la eego qaab dhismeedka waxbarashada, waa in ardayga afkiisa hooyo aanu ahayn Iswidhish uu bartaa luqad labaad ah oo uu isticmaali karo. Waxbarashada luqada waxey ardayga siineysaa qalab uu adeegsado markuu wada xiriir sameynayo iyo inuu si firfircoon uga qaybqaato nolol maalmeedka, tan bulshada, tan shaqada iyo inuu waxbarashadiisa sii wato. Ardayga waxa sidoo kale la siinayaa fursad uu ku horumariyo xeelado kala duwan oo ku saabsan sida loo barto luqadaha iyo sidoo kale xeeladaha lagu taageerayo wada-xiriirkiisa. Waxbarashadaan ujeedadeeda kale waa iney siiso dadka ajnabiga oo ey ka maqantahay aqoonta aasaasiga ah ee akhriska iyo qoraalka, iney iyagana helaan fursaddaas. Ardayga aanan aqoon qoraal iyo akhris laatiin ah ama xuruuftooda eysan leheen xarfaha laatiinka waxaa la baraayaa akhris iyo qoraal, waxbarashadan ayeyna qeyb ka ahaaneysaa.

Waxbarashadaan waxaa loogu tala galay dad khibradahooda kala duwantahay, xaalada noloshodooda, aqoontooda iyo hadefka waxbarashadooda ey kala duwanyihiin. Casharrada waxbarashada waa in lala qorsheeyaa oo lala dhisaa ardeyga, waa in la waafajiyaa waxyaabaha ardeygu xiiseynayo, khibradiisa, dhammaan aqoontiisa iyo hadefkiisa mustaqbalka fog.

Waxbarashada waa in, ayaado la fiirinaayo ardeyga baahidisa, ey isku keenikarto waxbarashada iyo shaqo ama meheradooyin kale, ku jiheyn shaqo iyo mid bulsho, qiimeyn khibrad, shaqo gacmeed ama waxbarasho kale. Sidas daraadeed wa in casharrada waxbarashada loo qaabeeyaa sida macquulsan markey noqoto waqtiga, goobta iyo waxa ey ka koobantahay iyo noocyada shaqada.

## Hadafka waxbarashada iyo sifada

Waxbarasho degmeedka ku aaddan barashada luqada iswiidhishka ee loogu tala galay ajnabiga waa inuu ardayga horumar ka gaaraasin

- aqoontiisa akhriska iyo qorista iswiidhishka,
- aqoontiisa ku hadalka, dhageysiga iyo wada-hadalka iswidhishka,
- kartidiisa fahanka luqadda iswidhishka ee hadalka iyo qoraalka,

- aqoontiisa ku aaddan in luqada la waafajiyo ujeedooyin kala duwaan iyo xaaladaha,
- ku dhawaaq wanaagsan,
- fahmidda siyaabahaloo barto,
- istaraatiijiyad waxbarasho, akhris iyo mid wada xiriir oo ku aaddan sidii uu u horamin lahaa luqada
- aqoontiisa ku aaddan sida loo isticmaalo qalabka teknaloojida iyo qalabyo muhiim u ah fahankiisa waxbarasho iyo xiriirka, iyo
- aqoontiisa ku aaddan sida leesku waafajiyo macluumaadka laga soo wariyay goobaha kala duwan.

Waxbarashada luqada iswidhishka ah ee loogu tala galay dadka ajnabiga waxaa muhim ah in ardeyga horumar ka gaaro awooddiisa luqad kuwada xiriirka. Taasoo micnaheedu tahay in ardeyga oo isticmaalikaro luqada markeey noqoto ku hadalka iyo qoralka, inta uu markaas baahida u qabo. Ardeyga waa muhim in oo helaa aqoon iyo awood kala duwaan si oo u adeegsankaro luqad markas ku habboon xalada xilligas tagan. Aqoonta luqada wada xiriirka waxey ka kobbantahay xirfadda kala duwaan oo wada shaqeynaayo iyo iswada dhammeystiraayo. Aqoon luqadadeed waxeey ka koobbantahay nidaamka luqada ku dhisantahay iyo sida nidaamka luqadas loo isticmaali lahaa.

Waxbarashada waxey ardayga siineysaa fursado uu ku hormarin karo aqoontiisa iyo xariifnimadiisa kala duwan, iyo inuu isticmaalo xeelado si uu u sameeyo doorasho sax oo ku aaddan luqadda uu isticmaalayo xaaladaha kala duwan ee wada xiriirka. Culuumta habka luqadda u dhisantahay waxey ka koobantahay ereyo, jumlado, ku dhawaaqid iyo naxwaha, halka aqoonta isticmaalka luqadda ey ku saabsantahay sida loo dhiso qoraal isla markaana la sameeyo doorasho luqad la isticmaali karo iyadoo laga duulayo qofka guddoomaya iyo ujeeddada laga leeyahay. Culuum kale oo muhiim ah waa in la isticmaali karaa istaraajiyad wanaagsan oo ah sida ugu wanaagsan ee uu qofka u gudbin karo dhambaalkiisa.

Waxbarashada waxuu ardayga kula kulmayaa qoraallo kala duwan oo ereyo, sawirro iyo cod ey isla wada jaanqaadayaan haddii ey ahaan laheyn mid teknoloojiyada dijitaalka ah iyo mid kaleba. Waxbarashada waa iney ardayga ka caawisaa siduu u hormarin lahaa ogaanshihiisa ku aaddan barashada luqadda iyo ogaanshaha qaabkiisa waxbarasho. Ardayga waa in la siiyaa fursad uu ku hormarin karo aqoontiisa dhaqanka isagoo ka fikiraya sida khibraddiisa dhaqameed uu u barbardhiganyahay waxyaabaha kale ee nololmaalmeedka bulshada, waxbarashada iyo nololshaqeedka Iswiidhan.

Waxbarashada xattaa waa iney hormarisaa inuu ardayga kor u aqaado aqoontiisa ku aaddan teknaloojiyadda dijitaalka, waxyaabaha muhiimka ee warbaahinta, wada xiriirka iyo waxbarashada.

## Waxbarashada qaabka ey u dhisantahay

Waxbarasho degmeedka ku aaddan barashada luqada iswiidhishka ee loogu tala galay ajnabiga waxey ka koobantahay saddex waddo, 1, 2 iyo 3 iyo afar koorso oo kala duwan, A, B, C iyo D. Wadada waxbarashada 1 waxa la dhigan koorso A, B, C iyo D, wadada waxbarashada 2 waxa la dhigan koorso B, C iyo D halka wadada waxbarashada 3 ey ka koobantahay koorso C iyo D. Waddooyinka waxbarasho ee kala duwan waxaa loogu tala galay dad meelo kala duwan kasoo jeeda isla markaana leh baahiyo iyo hadafyo kala duwan. Waddooyinka waxbarasho waxey tusinayaan koorsada uu qofka u qalmo inuu billaabo xawaaraha uu qofka wax u baran karo. Ardayga waxuu wadada waxbarasho ee u ku habboon isla markaana dabooli kara baahidiisa shaqsiyadeed. Shuruud cilmiyeedka koorsooyinka waa isku mid xattaa haddii uu qofka qaato waddo waxbarasheedka uu rabo.

Waddada waxbarasho 1 waxaa loogu tala galay dadka aan waxbarasho badan usoo dhigan halka waddada waxbarashada 3 loogu tala galay dadka ey waxbarashada caadada u tahay.

Qiimeynya waddada waxbarasho ee ardayga ku habboon iyo koorsada uu dhiganayo waa iney noqdaan kuwo ka duulaya daraaad lagu sameeyo cilmiga ardayga, kartidiisa iyo fursadihiisa ku aaddan kasoo bixidda shuruudaha leyska rabo.

Koorsooyinka saddax waddo waxbarasho waxey yeelayaan qaabab kala duwan waxeyna ku saleysan yihiin caadada waxbarasho ee ardayga, baagaraanka waxbarasho iyo aqoontiisa luqadda marka ey koorsada billaabaneyso.

Ardayga wuxuu dhameyn karaa waxbarasho degmeedka ku aaddan barashada luqada iswiidhishka ee loogu tala galay ajnabiga marka uu dhameeyo koorso kasta. Laakiin ardayga kasta waxaa la siinayaa fursad uu ku akhrisan karo illaa koorsada D, iyadoo la raacayo shuruudaha leyskaga baahanyahay si uu ardayga u gaaro aqoonta leyska rabo.

## Barashada akhriska iyo qoralka

Baritaanka ku saabsan akhris iyo qoraal waxaa loogu talagalay dadka aan waxbarasho hore u soo dhiganin ama in yar oo waxbarasho ah soo dhigtay lakiin aqoonta qoraalka u dhimmantahay. Ayaga waxbarashadan waxey siineysaa aqoonta aasaasiga ah ee akhriska iyo qoraalka. Waxbarasho degmeedka ku aaddan barashada luqada iswiidhishka, ee loogu tala galay ajnabiga iyo waddada waxbarashada 1waxaa ardayga la siinayaa fursad uu ku kasban karo akhriska iyo qoraalka asaasiga ah, taasoo ka dhigan in aqoonta si qoto dheer oo otomaatik ah loo barto. In si asaasi ah loo barto akhriska iyo qoraalka waqti dheer ayey qaadaneysaa.

Barashada asaasiga ah ee akhriska iyo qoraalka waxaa looga baahan karaa waddooyinka waxbarasho ee 2 iyo 3 ee ardayga wax dhigan kara laakiin aan garaneyn sida xarfaha laatiinka ah wax loogu qoro. Markaas boroseeska waxbariddooda si kale ayuu u ekaanayaa.

Barashada asaasiga ah ee akhriska iyo qoraalka koorsoyinka kuma xirna mid ka mid ah koorsooyinka A-D, waa waxbarasho qeyb kaligeed ah oo koorsooyin lagu dhameystirayo. Kaligeed ba la dhigankara ama koorso iyo ayaada la isla dhigankara. Waa borosees qaadan waqtiga uu ardayga dhiganayo waxbarasho degmeedka ku aaddan barashada luqada iswiidhishka ee loogu tala galay ajnabiga, illaa iyo inta aqoonta ka noqoneyso mid otomaatik ah.

Waxbarashada waxey ku bixi kartaa luqadda hooyo ee ardayga ama luqad kale oo uu ardayga fahmayo.

Iyadoo laga duulayo waxbarashada asaasiga ee barashada qoridda iyo akhriska ayaa ardayga waxaa fursad loo siinayaa

– inuu hormariyo fahankiisa ku aaddan sida qoraalka u xiriiriyo dhambaallada iyo sida luqadda ey u dhisantahay,
– inuu hormariyo awooddiisa ah inuu isticmaalo luqadda xaaladaha kala duwan,
– inuu muujiyo inuu shaqaanno sharciyada ugu caadisan ee qoridda,
– inuu isticmaalo akhris iyo qoraal si uu wax u barto, wax u fahmo waxa u dhihi karo,
– inuu ogyahay sida luqadda loo barto,
– inuu yaqaan istaraatiijiyado fudu oo ah sida ujeeddooyin kala duwan wax loogu akhriyo loona qoro,
– iyo inuu isticmaalo teknaloojiyadda dijitaalka ah iyo caawimaadaha kaloo muhiimka u ah akhriska iyo qoridda.

## Qiimeyn

Marki ardeyga la qiimeynaayo waa in la fiiriya ardeyga awooddiisa ku aaddan siduu si la fahmi karo ugu isticmaalayo luqada iswidhishka markey noqoto xaladaha khuseeya nolol maalmeedka, bulshada iyo shaqada. Qiimeynta waa iney ahaataa mid ku dhisan shuruudaha aqoonta ee natiijada Gudbitaanka (Godkänt). Shuruudda aqoonta waxey ku dhisantahay shan arrin: fahanka maqalka, fahanka akhriska, wada hadalka afka, soo saarida hadalka afka iyo aqoonta qoraalka iyo qoridda. Qeybaha aqoonta shuruudahooda si gooni gooni ah looma kala qeybin karo sidaas daraadeed macallinka waa inuu qiimeeyn guud ku sameeyaa aqoonta luqadda ardayga waana inuu qiimeynta ku saleeyaa waxa uu ardayga yaqaan. Saxnaashaha luqadda waxaa la barbardhiyaa waxa ey ka koobantahay iyo qaab dhismeedkeeda.

Iyadoo laga duulayo cutubka 20. Qodobka 35 § ee qaanuunka iskoolka (2010:800) ayaa koorso oo la dhigto waxaa lagu helayaa natiijo. Qeybta waxbarashada asaasiga ah ee akhriska iyo qoraalka natiijo laguma heleyo.

## Shuruuda aqoonta

### Koorso A

Shuruudaha aqooneed ee natiijada gudbitaanka (Godkänt)

#### Fahamka dhegeysiga

Ardaygu isagoo la taageerayo wuxuu fahmayaa hadalka waadixa ah ee fudud ee la taaban karo, ee xaaladaha maalinlaha ah. Ardaygu waxa uu fahmaa erayo iyo weedho fudud ee caadiga ah ee dhacdooyin maalinle ah oo si gaaban dib looga hadlayo. Ardaygu wuxuu fahmaa macluumaadka loogu talo galay ee waadixa ah iyo sidoo kale tilmaamo afka ah oo fudud oo caadi ah.

#### Fahamka akhriska

Ardaygu wuxuu akhriyaa oo fahmaa macluumaad fudud oo la taaban karo, xaaladaha maalinlaha ah. Ardaygu wuxuu akhriyaa oo fahmaa macluumaadka ah qaab ereyo iyo calaamado caadi ah, weedho aad u fudud iyo qoraallo la habeeyey oo aad u fudud oo ku saabsan mawduuc la garanayo.

#### Xiriir Wadahadal

Ardaygu isagoo la taageerayo ayuu samaynayaa xiriir wadahadal oo la taaban karo, xaaladaha maalinlaha ah. Ardaygu waxa uu ka qayb qaataa wada sheekaysi maalinle ah oo aad u fudud. Wuxuu ardaygu wada-sheekaysigan u adeegsadaa erayo fudud, salaamo, odhaahyo xushmad iyo sagootin ah oo uu ku weydiiyo oo ka jawaabo su'aalo fudud oo ku salaysan baahiyo la taaban karo**.**

#### Soo saarka hadalka

Ardaygu isagoo la taageerayo ayuu samaynayaa xiriir wadahadal oo luqad fudud ah oo la taaban karo, xaaladaha maalinlaha ah. Ardaygu waxa uu ku sheekaynayaa erayo iyo weedho fudud oo caadiga ah ee ku saabsan xidhiidhada shakhsiyeed iyo khibradaha.

#### Xirfadaha qorista

Ardaygu waxa uu ku qoraa macluumaadka shakhsiyeed erayo iyo calaamado fudud oo la taaban karo, xaaladaha maalinlaha ah. Ardaygu wuxuu qoraa macluumaad muhiim ah oo ku salaysan baahiyo la taaban karo oo qaab dhab ah u socda.

## Koorso B

Shuruudaha aqooneed ee natiijada gudbitaanka (Godkänt)

### Fahamka dhegeysiga

Ardaygu wuxuu fahmaa hadalka waadixa ah ee fudud ee xaaladaha caadiga ah ee nolol maalmeedka. Ardaygu waxa uu fahmaa dhacdooyinka gaagaaban ee dib looga sheekaynayo, wadahadalka, macluumaadka iyo wararka loo habeeyey ee mawduucyada caanka ah. Ardaygu wuxuu fahmaa fariimaha iyo tilmaamaha hadal ee gaagaaban ee cad.

### Fahamka akhriska

Ardaygu wuxuu akhriyaa oo fahmaa qoraallada fudud xaaladaha caadiga ah ee nolol maalmeedka. Ardaygu waxa uu akhriyaa oo fahmaa sheekoyin iyo qoraallo la habeeyey oo ku saabsan mawduucyo caan ah, macluumaad la taaban karo iyo fariimo gaaban, cad oo fudud.

### Xiriir Wadahadal

Ardaygu isagoo la taageerayo ayuu samaynayaa xiriir wadahadal oo xaaladaha maalinlaha ah. Ardaygu waxa uu ka qayb qaataa wada sheekaysi fudud oo ku saabsan mawduucyo caan ah. Marka la samaynayo wadahadalka, ardaygu wuxuu soo bandhigaa oo ka falceliyaa odhaahyada, ra'yiga iyo rabitaannada, wuxuuna weydiiyaa kana jawaabaa su'aalaha qaab ilaa xad u laasimaya wada hadalka.

### Soo saarka hadalka

Ardaygu isagoo la taageerayo ayuu samaynayaa xiriir wadahadal oo luqad fudud ah ee xaaladaha la taaban karo ee maalinlaha ah. Ardaygu wuxuu si fudud uga sheekeeyaa khibradaha shakhsi ahaaneed iyo dadka, meelaha iyo dhacdooyinka caanka ah. Ardaygu waxa uu wax u sheegaa qaab la fahmi karo oo ilaa xad xiriisan.

### Xirfadaha qorista

Ardaygu wuxuu akhriyaa oo fahmaa qoraallada fudud ee xaaladaha caadiga ah ee nolol maalmeedka. Ardaygu wuxuu qoraa fariimo, salaan iyo qoraallo shakhsiyeed iyo dhacdooyin khibradeed oo gaagaaban oo fudud oo la fahmi karo. Ardaygu waxa uu inta badan sameeyaa in macnaha guud ee qoraalladiisu shaqeeyaan.

## Koorso C

Shuruudaha aqooneed ee natiijada gudbitaanka (Godkänt)

### Fahamka dhegeysiga

Ardaygu wuxuu fahmaa hadalka cad ee fudud ee xaaladaha caadiga ah ee nolol maalmeedka, bulsho, waxbarasho iyo shaqo. Ardaygu waxa uu fahmaa

dhacdooyinka, sharaxaadaha, wada-sheekaysiga, macluumaadka iyo wararka gaagaaban ee dib looga sheekaynayo ee la xidhiidha mawduucyo caan ah. Ardaygu wuxuu fahmaa fariimaha iyo tilmaamaha hadal ee fudud ee cad.

### Fahamka akhriska

Ardaygu wuxuu akhriyaa oo fahmaa qoraallada fudud ee xaaladaha caadiga ah ee nolol maalmeedka, bulsho, waxbarasho iyo shaqo. Ardaygu wuxuu akhriyaa oo fahmaa sheeko gaaban iyo qoraallo wax sharraxaya oo ku saabsan mawduucyo caan ah, qoraalo fudud oo wargelin ah, shax iyo jaantusyo iyo weliba sababayn fudud oo ku saabsan macluumaadka. Ardaygu wuxuu akhriyaa oo fahmaa tilmaamo iyo xeerar gaagaaban oo cad.

### Xiriir Wadahadal

Ardaygu waxa uu xiriir wadahadal ku sameeyaa luqad fudud oo ilaa xad ku salaysan ujeeddada iyo qofka uu la sheekaysanayo ee xaaladaha caadiga ah ee nolol maalmeedka, bulshada, waxbarashada iyo shaqada. Ardaygu waxa uu ka qayb qaataa wada sheekaysi iyo doodo fudud oo ku saabsan mawduucyo caan ah. Waxa uu wadahadalkan ardaygu soo bandhigaa oo uu codsadaa ra'yi, fikrado iyo macluumaad qaab ay ilaa xad hore u socodsiiya wada-hadalka iyo doodaha.

### Soo saarka hadalka

Ardaygu waxa uu xiriir wadahadal ku sameeyaa luqad fudud oo ilaa xad ku salaysan ujeeddada iyo qofka ay ku socoto ee xaaladaha caadiga ah ee nolol maalmeedka, bulshada, waxbarashada iyo shaqada. Ardaygu wuxuu si fudud u sharraxaa oo uga sheekeeyaa khibradaha shakhsiyeed iyo dadka, meelaha iyo dhacdooyinka caanka ah. Ardaygu waxa uu wax u sheegaa qaab la fahmi karo oo ilaa xad xiriisan isagoo weliba muujinaya kala duwid erayo luqadeed.

### Xirfadaha qorista

Ardaygu waxa uu qoraa qoraallo fudud fudud oo ilaa xad ku salaysan ujeeddada iyo qofka ay ku socoto ee xaaladaha caadiga ah ee nolol maalmeedka, bulshada, waxbarashada iyo shaqada. Ardaygu waxa uu qoraa sheeko xidhiidhsan oo la fahmi karo iyo qoraallo sharraxaad oo ku saabsan waayo-aragnimada, shucuur iyo ra'yiyo iyo sidoo kale qoraallo macluumaad leh oo ku saabsan mawduucyo caan ah. Ardaygu waxa uu inta badan sameeyaa qoraal leh qaabdhismeed shaqaynaya wuxuuna muujiyaa kartida kala duwanaanshaha erayada iyo dhismaha jumlada.

## Koorso D

Shuruudaha aqooneed ee natiijada gudbitaanka (Godkänt)

### Fahamka dhegeysiga

Ardaygu wuxuu fahmaa hadalka cad ee rasmiga ah ama aan rasmiga ahayn ee xaaladaha caadiga ah ee nolol maalmeedka, bulsho, waxbarasho iyo shaqo.

Ardaygu waxa uu fahmaa sheekooyinka, sharaxaadaha, wada-sheekaysiga, macluumaadka iyo wararka la xidhiidha mawduucyo caan ah. Ardaygu wuxuu fahmaa fariimaha iyo tilmaamaha hadal ee faahfaahsan ee waadixa ah.

### Fahamka akhriska

Ardaygu wuxuu akhriyaa oo fahmaa qoraallada fudud ee xaaladaha rasmiga ah iyo kuwa aan rasmiga ah ee nolol maalmeedka, bulsho, waxbarasho iyo shaqo. Ardaygu wuxuu akhriyaa oo fahmaa qoraallo sheeko, kuwa wax sharraxaya, kuwa wax tilmamaya iyo kuwa doodeed oo ku saabsan mawduucyo caan ah, qoraalo wargelin ah, shax iyo jaantusyo iyo weliba sababayn fudud oo ku saabsan macluumaadka. Ardaygu wuxuu akhriyaa oo fahmaa tilmaamo iyo xeerar waadix ah.

### Xiriir Wadahadal

Ardaygu waxa uu xiriir wadahadal ku sameeyaa ilaa xad ku salaysan ujeeddada iyo qofka uu la sheekaysanayo ee xaaladaha rasmiga ah iyo kuwa aan rasmiga ahayn ee nolol maalmeedka, bulshada, waxbarashada iyo shaqada. Ardaygu waxa uu ka qayb qaataa wada sheekaysi iyo doodo fudud oo ku saabsan mawduucyo caan ah iyo weliba inuu ku cabbiro oo kaga jawaabo ra'yiyada doodo fudud. Ardaygu wuxuu soo bandhigaa oo codsadaa fikrado iyo macluumaad ilaa xad u hore socodsiinaya wadahadallada iyo doodaha.

### Soo saarka hadalka

Ardaygu waxa uu xiriir wadahadal ku sameeyaa ilaa xad ku salaysan ujeeddada iyo qofka uu la hadlayo ee xaaladaha rasmiga ah iyo kuwa aan rasmiga ahayn ee nolol maalmeedka, bulshada, waxbarashada iyo shaqada. Ardaygu waxa uu sharaxaa, ka sheekeeyaa, ugana warbixiyaa qaab fudud dhacdooyinka taagan, waaya-aragnimada, shucuurta iyo ra'yiyada, wuxuuna bixiyaa talo iyo tilmaamo. Ardaygu waxa uu wax u sheegaa qaab la fahmi karo si faseexnimo ah oo ilaa xad xiriisan isagoo weliba muujinaya kala duwanaan erayo luqadeed.

### Xirfadaha qorista

Ardaygu waxa uu qoraa qoraallo fudud oo ilaa xad ku salaysan ujeeddada iyo qofka ay ku socoto ee xaaladaha rasmiga ah iyo kuwa aan rasmiga ahayn ee nolol maalmeedka, bulshada, waxbarashada iyo shaqada. Ardaygu wuxuu qoraa qoraallo faseexnimo ilaa xad ah, isku xidhan oo la fahmi karo oo ah qoraallo sheeko, kuwa wax sharraxaya, kuwa wax tilmamaya iyo kuwa doodeed oo ku saabsan mawduucyo caan ah. Ardaygu waxa uu inta badan sameeyaa qoraal leh qaabdhismeed shaqaynaya wuxuuna muujiyaa kala duwanaanshaha erayada iyo dhismaha jumlada. Ardaygu waxa uu isagoo is-huba qoraalkiisa ku isticmaalayaa qaabdhismeed naxwe oo fudud iyo mid horumarsan.